



Ku tufida, qardhaasta, iyo madiidadu waa shirki

Cabullaahi Binu Mascuud Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw ayaan ka maqlay isagoo dhahaya: " Ku tufida, qardhaasta, iyo madiidadu waa shirki."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay Abuu Daa'uud Ibnu Maajah iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey waxyaabo samayntoodu tahay shirki waxaana ka mida: Tan koobaad: waa hadalkii ay isku dawayn jireen dadkii waqtigii jaahiliga, kaasoo ka koobnaa waxyaabo shirki ah. Tan labaad: qardhaasta oo ah wax taxan oo kale, taasoo loo xiro caruurta, xoolaha iyo qayrkoodba iyado laga ilaalinayo isha. Tan saddexaad: madiidaynta: waa wax loo sameeyo labada qof ee is qabta mid in la jeclaysiiyo kan kale. Arimahaasi waxay ka mid yihiin shirkiga, dad ayaa sabab ka dhigaya, mana aha sabab sharciya oo daliil ku sugnaatay, mana aha sabab xisi ah oo khibrad ku sugnaatay. Asbaabta shirciga ah sida akhrinta Qur'aanka, ama asbaabta xisiga ah sida daawada khibrada lagu ogaaday, way banaan tahay iyado la rumaysan yahay inay tahay asbaab uun, nafaca iyo dhibkuna Ilaahay gacantiisa ku jiraan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5273>

